



## Enheten för flerspråkighet, EFF

- Ku wajahan howlaha degmada iyo kuwa madaxa banaan labadaba
- Barashada afka hooyo ee dugsiyada hoose/dhexe, sare iyo kuwooda baahida gaarka ah
- Taageerada afka hooyo ee dugsiya barbaarinta
- Hagaha waxbarshada ee afka hooyo
- Caawinta hordhaca ah ee afka hooyo
- Daraasaadka howlaha afka hooyo
- Imtixaanida maadada afka hooyo ama koorsada afka hooyo

Enheten för flerspråkighet

[flersprakighet@ uppsala.se](mailto:flersprakighet@ uppsala.se)

018-727 20 26



## Waxbarashadda afka hooyo

 <p><b>Grundskola &amp; grundsärskola</b> Modersmål är ett ämne som kan läsas hela grundskoletiden.</p>	 <p><b>Gymnasieskola &amp; gymnasiesärskola</b> Modersmål kan läsas i form av modersmålskurser.</p>
 <p><b>Nationella minoritetsspråk</b> Nationella minoritetsspråk som modersmål i Uppsala kommun</p>	 <p><b>Förskola</b> Riktat stöd till förskolebarn som kan ansökas av förskolans pedagoger.</p>

[flersprakighet.uppsala.se](http://flersprakighet.uppsala.se)



## Yaa akhrisan kara afka hooyo?

*(ma khuseyso luqadaha qaranka ee laga badan yahay)*

Ardayga haysta masuul ku hadla afka hooyo oo aan ahayn iswidhish waa in la siiyaa waxbarid afka hooyo haddii:

1. Luqaddu waa luqadda maalinlaha ah ee ardaygu guriga uga hadlo, iyo
2. Ardayga leh aqoonta aasaasiga ah ee luqadda.

Ardaygu waa inuu ku hadlaa oo fahmaa luqadda. Luqadda waxbariddu waa afka hooyo waxayna raacdaa manhaj qaran.

## Luqadaha wadaniga ee laga tirada badan yahay

Luqadaha wadaniga ee laga tirada badan yahay waa: finska, meänkieli, samiska, romani iyo jiddisch. Si aad u barato luqad laga tiro badan yahay waa inaad ka mid tahay dadka laga tiro badan yahay. Ardaygu uma baahna in uu afka ku isticmaalo guriga ama uu u leeyahay aqoon aasaaasi ah. Waxaa jira laba qorshe waxbarsho oo uu ardaygu kala dooran karo inuu luqadda ku hadlo iyo inuu bilow yahay si uu u dhigto luqadda.

Enheten för flerspråkighet (EFF) ayaa isku duwaya waxbarashadda afka hooyo.

## Aqoonta aasaasiga ah

Aqoonta aasaasiga ah waa shardi dhammaan luqadaha marka laga reebo luqadaha laga tiro badan yahay. Macalinka ayaa qiimeynaya aqoonta aasaasiga ah marka waxbariddu bilaabato. Fahanka dhegeysiga iyo awooda ku hadalka waa la qiimeynaa. Warbixinta ku saabsan aqoonta aasaasiga ka fiiri bogga EFF.

## Sidaan ayaad u codsanaysaa

Waalidka ardayga ayaa sameynaya codsiga. Foomka codsiga waxaad ka heli kartaa bogga EFF. Buuxi foomka, kadib saxiix oo u gudbi dugsiga ardayga. Maamulaha ayaa ogolaanaya codsiga, kadibna waa inuu u diraa EFF, ugu danbeyn 15 juun ee sanad dugsiiyeedka soo socda. Codsiga yimaada 15 juun ka dib boos looma balanqaadi karo.

## Habka Qaabeynta waxbaridda

Uppsala, Afka hooyo waxaa la dhigtaa wakhti ka baxsan saacadaha casharada caadiga ah. Inta badan casharada waxaa la dhigtaa xisaddaha iskuulka ka dib. Ardayda fasalada F-5 waxay casharada ku leeyihiin iskuulkooda. Ardayda fasalada 6–9 waxay isugu yimaadaan dugsi loo qoondeeyay intii isku heer ah, galabtii ama fiidkii. Ardaygu wuxuu tagaa dugsigii loogu talagalay. Haddii ardaygu aanu haysan kaarka baska, macalinka afka hooyo ayaa kaarka u qaybinaya.

## Macluumaad dheeraad ah

Bogga EFF waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxbaridda afka hooyo ee Uppsala.

[flersprakighet.uppsala.se](https://flersprakighet.uppsala.se)

